

## **Dabeylaha Xoogga leh ee Xagaaga**

Marka ay jiraan dabeylaha xoogga leh ee xagaaga, cimiladu waxey noqon kartaa, qaboow, mid dabeyl amd baraf leh. Dabeylaha xoogga leh ee xagaaga waxaa ay socon karaan saacada yar ilaa maalma dhowr ah. Si aad ubadbaadid, raac talooyinka.

Sida aad u wacda oo kale nambarka 9-1-1 si aad taageera ugu heshid qof dhaawac uu soo gaaray ama khatar ku jira, waxaad wici kartaa nambarka 2-1-1 si aad u heshid macluumaad kuugu caawiya xalinta mushkilaadkaada, sida dhibaatooyinka cimilada. Ka garaac nambarka 2-1-1 telefoonkaaga ka dibna sheeg luqadda aad ku hadasha. Qof ayaa su'aalahaada kaaga jawaabi doona afkaaga.

### **Diyaar noqo.**

*Taxadarka Dabeylaha Xagaaga* waxey micnaheedu tahay waxaa ay cimiladu noqon kartaa xaalad qaboow daran le maalinta soo socota ama labada maalmood ee soo socda.

*Digniinta Dabeylaha Xagaaga* waxey micnaheedu tahay waxaa soo socda xagaa daran ama durba waa ladareemayaa.

*Latalin ku aadan Cimilada Xagaaga* waxey micnaheedu tahay waxaa laga yaabaa cimilada xagaaga in gaari kaxeeynta ama aadista banaanka ay ka dhigi karta mid adag ama khatar ah.

*Digniinta Dabeylaha sita Barafka* waxey micnaheedu tahay in baraf iyo dabeyla xoog leh ay banaanka qaboow saaid ah ka dhigi doonaan oo qarin doona muuqaalka.

*Digniin Barafid/Barafoobid* waxey micnaheedu tahay waxaa soo socda heerkul barafid leh oo laga yaaba in ay wax u dhimaan abuurka iyo geedaha.

### **Dhageysa raadiyaha.**

- Wa inuu jiraa qof fahmaaya luqadda Ingriiska si uu kugu dhageysta raadiyah oo uu ugaada waxa dhacaaya iyo waxa aad sameyneysa.

### **Badbaadada xiliga dabeylaha xoogga leh ee xagaaga.**

#### **Guriga:**

- Guriga joog haddii aad awoodda.
- Korontada waxaa laga yaabaa in ay shaqeyn weyda. Guriga haa kuutaala cunta iyo biya kuugu filan muda maalma ah haddii ay dhacda inaad ka tagin guriga.
- Haddii aad haysata moobayl, dab badan haa lahaada.
- Gudaha haa ku isticmaalin shabaqa biraha leh ee wax lagu duba oo banaanka la dhigta. Wuxuu soo saari karaa gaas oo kuwaxyeeyn kara ama ku dili kara.
- Dhibayca biya ah haa ka socdeena dararka iyo tuubooyinkaada si aysan u barafoobin.
- Garaac 2-1-1 haddii kululeeyayaasha oo dhan aad weyda ama guriga ay ka jirta mushkilad weyn.

#### **Banaanka:**

- Haddii ay khasab tahay inaad aado banaanka, xira dhar kuleel leh oo astura jirkaada oo dhan.
- Xira lakabyo dharka kuleelka leh ah. Xira koofiyad. Afkaaga iyo Sanka ku dabool mara. Cagahaada ha angagnaadeena. Xira sharabaadya dhogor jilacsan leh.
- Inta badan raadi darar barafoobay ama qeybaha jirkaada. Maqaar barafoobay jirka kale wuu ka duwanaanayaa waxaana laga yaabaa inuusan wax dareen ah leheyn, waxaana laga yaabaa

inuu adkaada oo ladhaqaajinwaaya. Haddii aad dareenta inaad leehdahay maqaar barafobay ama qeyb jirka ka mid ah, gudaha gala tartiibna u kululee. Haa rugun qeybaha kaa barafobay.

- Taxadar samey marka aad banaanka socotid. Goobaha agagaarka wadada ee lagu socda waxaa laga yaabaa in ay leehyihiin baraf iyo simbriixya.

### **Baabuurk gudahiisa:**

- Haddii ay khasab tahay inaad baabuur kaxeysid, taxadar muuji. Muda dheer ayey qaadanaysaa si uu baabuurka u istaaga xowligiisa marka uu ku socda wadooyinka barafka iyo qaboowga leh. Baabuurka tartiib ukaxeey, baabuurkaaga iyo baabuurka ka horeeya masaafa haa u dhaxeysa.
- Tartiiib ujooji gaariga marka uu ku socda wadada barafka ama qabowga leh. Haddii ay lugaha baabuurka isxiraan, tartiib uuga kac xowli joojiyaha.
- Daar nalalka baabuurkaada si baabuurada kale ay kuu arkaan.
- Gaaska ku jira baabuurkaaga haa ahaada mid buuxa si uusan ubarafobin.
- Qalabka gurmada deg degga ah haa ku jireena baabuurkaaga: busto, nalalka laisugu baaqa, biyaha lagu dhaqa quraaradda celisa dabeesha, aaladda lau ruga quraaradda celisa dabeesha, waayarada lagu kiciya bateriga gaariga markuu damo, cunno iyo biyo.
- Haddii uu baabuurkaaga ku xayirma barafka meel ka fog taageera, haa aadin meel fog si aad u raadsatid gurmada. Waxaa badbaada leh inaad ku jirta baabuurkaaga oo gudahiisa aad ku sugta taageera. Haddii aad u baahantahay in kululeysada ay kuu daarnaata, hubi in tuubada bixisa qaaqa uusan qarineynin barafka. Haddii uusan jirin qof jooga agagaarka, taageera uwaca.